HIV – qof qaba HIV oo si fiican loo daweeyo, macluumaad bukaan

Warqadda ka gaashaamashada cudurrada lays qaadsiiyo ee dhakhaatiirta ka hortaga cudurrada leys qaadsiiyo

Waa maxay sababta aad warbixintan laguu siinayo?

Waxaad qabtaa infekshinka HIV oo lagu daweeyo dawooyin hakinaya, taasoo dhakhtarkaagu uu u aragyo in si fiican loo daweeyo. HIV si fiican loo daweeyo waxaa loola jeeda:

- In heerka feyruuska ee dhiiggaagu uu mar walba ahaanayaa mid aan la cabbiri karin.
- In si sugan oo joogto ah aad u qaadatid dawada laguu qoray.
- In, caadi ahaan 2-4 jeer sanadkiiba ama si waafaqsan aragtida dhakhtarkaaga, aad si joogto ah ugu imaaneysaa koontaroolidda lagu sameynayo heerka feyruuska iyo daweynta.

Muxuu yahay HIV?

HIV waa feyruus saameyn ku yeelanaya nidaamkaaga difaaca ee jirka. Maanta waxaa jirta dawo, haddii si sax ah loo qaato, yareyneysa inta feyrus ah ee jira ku jirta, taasoo keeneysa in qof HIV qaba uu noolaan karyo nolol fiican oo dheer. Haddii uu qofku qabyo infekshin HIV oo si fiican loo daweeyo, haba yaraatee ma jirto khatar ah in uu qof kale galmo wax ku qaadsiiyo. Infekshinka uu HIV-gu keeno maaha mid si buuxda looga bogsoodo, ee xitaa haddii qofka si fiican loo daweeyo feyrusku jirka wuu ku jirayaa.

Sidee baa leesu qaadsiiyaa HIV-ga?

HIV-ga waxaa inta badan la isku qaadsiiyaa galmo aan la is-ilaalin, oo ah siilka ama dabada, iyo mararka qaarkood afka oo leeska waso. Dhiigga uu ku jiryo HIV-gu waa mid aad wax u qaadsiin og, HIV-gana waxaa qofba qof kale looga gudbin karaa in lagu shubo dhiig laga qaaday qof cudurka qaba iyo in cirbad ama waxyaabaha kale ee leesku mudo oo loo adeegsaday qof cudurka qaba loo isticmaalo qofka. In si fiican loo daweeyo HIV-gu waxay aad u yareyneysaa inta feyrus ah ee dhiigga ku jirta ilaa heer uusan qofku qof kale cudurka galmo kula qaadsiin kareynin. Haddii ay dhacdo dhacda khatar ah oo keeni karta in dhiig wax leesku qaadsiiyo, tusaale ahaan muditaan, jeexid ama cirbad wadaagid, si fiican looma daraaseyn in qof si fiican HIV-ga looga daweeyo uu qof kale wax qaadsiin karyo iyo in kale, sidaas darteed qaadsiinta si buuxda meesha loogama saari karo. Hooyadu HIV-ga canugga wey ugu gudbin kartaa uurka, dhalitaanka iyo nuujinta. Haddii hooyada lagu ogyahay infekshinka HIV-ga gebi ahaanba meesha waa laga saari karaa khatarta ah in ay canugga qaadsiiso iyadoo la daweynayo iyo iyadoo ka baaqasaneysa in ay canugga nuujiso.

Goormee aan HIV-ga qof la qaadsiin karin?

HIV-ga leeskuma qaadsiiyo hab isi siin, dhunkasho ama isi salaaxid. Sidoo kale illin, kaadi, saxaro, mantag ama diif uusan dhiig ku jirin wax laguma qaadsiiyo. Dhiigga maqaarka aan dhaawacneyna sidoo kale ma laha wax khatar ah oo qaadsiin ah.

Xuquuq

Sida ku cad xeerka ka gaashamashada cudurrada lees qaadsiiyo baaritaanka, booqashada rugaha qaabilaadda iyo daweynta HIV-gu wey lacag la’aan.

Waxaad sidoo kale xaq u leedahay taageero la xiriirta bulsho- iyo xag nafsinimo taasoo loo baahan karo si loo maareeyo cudurka. Dhakhtarkaaga ayaa ku siinaya talooyin ku aaddan sida aad uga fogaan kartid in aad dadka kale khatar gelisid.

Xagga shaqeysashada
Infekshinka HIV-gu sida caadiga ah ma keeno xannibaado ku aaddan waxbarashada ama in aad shaqeysatid.

Uur iyo nuujin
Waxaad heli kartaa caawimaad si adiga/lamaanahaagu aad u uureysataan iyadoo ay aad u yartahay khatarta ah in aad cudurka canugga u gudbisaan. Si canugga loo ilaaliyo waxaa haweeneyda uurka leh ee la nool HIV-ga ku waajib ah in ay hey'adaha caafimaadka waqti hore oo uurka ka mid ah ku wargeliso infekshinka HIV-geeda si loo qaado tallaabooyin wax looga hor tegayo. Dumarka HIV-ga qaba maaha in ay wax nuujiyaan.

Carruurta qabta HIV-ga
Waaliddiinta iyo carruurtu waxay dhakhtarkooda ka helayaan macluumaad tartiib-tartiib ah oo da'dooda u qalma oo ku aaddan ka gaashaamashada qaadsiinta. Carruurta la nool HIV-gu waxay si la mid carruurta kale xaq ugu leeyihiin xannaano carruureed iyo iskool laakin waxay lahaan karaan baahi gaar ah oo ay tahay in la tixgeliyo. Dhakhtarka qofka daweeya ama dhakhtarka ka gaashaamashada qaadsiintu macluumaad wey siin karaan dugsiga xannaanada haddi waaliddiintu ay oggolyihiin. Marka uu canuggu iskool billaabo waxaa habboon in la wargeliyo guddiga caafimaadka ardayda.

Cinjirka ka hortagga, marka la sameynayo galmo xagga siilka, dabada ama afka ah
Cinjirka ka hortaggu si fiican ayuu qofka uga badbaadiyaa HIV-ga iyo cudurrada kale ee galmada lagu kala qaado. Marka si fiican loo daweeyo HIV-ga waajib kugu maaha in aad isticmaashid cinjirka ka hortagga marka aad galmo sameneysid, laakin saas oo ay tahay waa leeskula taliyaa si looga hortago infekshinnada kale ee galmada leesugu gudbiyo..

Dhiigga waa in mar walba loo maareeyaa sida in uu leeyahay khatar xagga is qaadsiinta ah

- *Qofka dhiiggaagu uu gaari karyo mar uu dhaawac wax ka baddelayo ama wax sidaas oo kale ah waa in uu gacmo gashi isticmaalaa.*
- *Haddii dhiiggaagu qof gaaryo, tusaale ahaan uu meel furan oo dhaawacan ka gaaryo ama ku gaaryo duritaan- iyo jeexitaan, waa in aad qofka u sheegtaa in dhiigga uu ku jiryo HIV iyo in ay tahay in uu si dhakhsi ah ula xiriiryo rugta/heeganka infekshinka si lo qiimeeyo.*

Xeerar dad la macaamilidda ee ay khasab tahay in aad raacdid si aadan dad kale u qaadsiin
Sida ku cad xeerka ka gaashaamashada cudurrada lees qaadsiiyo HIV-gu waa cudur bulshada khatar ku ah. Wuxuu waajib kaa saaranyahay in aad ka hortagtid in aad waxa lees qaadsiiyo u gudbisid qof kale. Haddii ay imaan karto khatar ah in aad qof wax qaadsiisid waa in aad qofka kale u sheegtaa cudurkaaga. Halkan hoose waxaa ku yaalla xeerarka dad la dhaqmidda oo liis-gareysan si looga hortago qaadsiinta cudurka iyadoo la eegayo hadba aagagga xeerka lagu soo qaadayo. Waxyaabaha badankoodu wey khuseeyaan dhammaan dadka HIV-ga qaba oo dhan halka kuwa kale ay ku xiranyihiin xaaladdaada, sidoo kalana wey is beddeli karaan mar kasta

oo uu waqtigu horuu socdaba. Waa dhakhtarkaaga cidda go'aamineysa kuwa kaa khuseyn doona xeerarka la dhaqmidda dadka ee hoos ku qoran.

1. *Si qof loogu shubo ama tallaalo uma bixin kartid dhiig, xubin ama nude.*
2. *Haddii, si daawo aad u isticmaashid, aad adeegsatid cirbado/tubbo dhuuban/ama qalab kale oo leesku mudo maaha in aad dad kale u oggolaatid in ay isticmaalaan waxyaabahaas.*
3. *Haddii aad isticmaaleysid cirbado/tubbo dhuuban si aad isugu durtid daroogo iyo wax la mid ah maaha in aad dad kale u oggolaatid in ay isticmaalaan waxyaabahaas. Sidoo kale ma isticmaali kartid koob wax qasid oo wadajir loo leeyahay. Dhammaan qalabka wax leeskula duro waa in loo xafidaa, loona tuuraa si aan dadka kale u keeneyn khatar wax qaadsiin.*
4. *Marka aad raadsaneysid daryeel caafimaad iyo daryeel ilko waa in aad u sheegtaa in uu "dhiiggaaga ku jiro cudur lees qaadsiiyo" in aan camaliyad laguugu sameyn taasoo ay jirto khatar sare oo ah in wax leesku mudo ama lees jeexitaan yimaado, tusaale ahaan haddii qalliin laguugu sameynayo. Marka baaritaannada fudfudud ee ruutiinka ah laguugula sameynayo laamaha caafimaadka iyo kuwa daryeelka ilkaha, sida dhiig qaadidda iyo duritaannada, uma baahnid in aad u sheegtid.*
5. *Dadka ha la wadaagin alaabaha musqusha ee wax goyn kara sida makiinadda timaha lagu jarto*
6. *Waa khasab in aad u soo laabatid booqashooyinka uu dhakhtarku u aragyo in ay lagama maarmaan yihiin.*

Haddii lagu siiyay xeer dad la dhaqmid oo aad qalad u aragtid, waxaad xiriir la sameyn kartaa dhakhtarka ka gaashamashada cudurrada lays qaadsiiyo ee gobalkaaga/maamul gobaleedkaaga.